# Luqadda iyo Isdhexgalka Bulshada

Isdhexgalka Bulshada
Fursadaha isdhexgalka Bulshada
Luqadda
Barashada af Jarmalka

# Isdhexgalka Bulshada

Gobolka Basel-Stadt markaa degan tahay waxaad leedahay xuquuq. Waxba kuma kala duwana inaa tahay Rag ama Dumar ama wadanka aad kasoo jeedo, luqada aad ku hadasho, diinta aad aaminsantahay ama xanuunada aad qabto. Waxaa doonto ahoow waxa waajib ah inaad ilaaliso sharciyada waddanka. Sidoo kale waxaa muhiim ah, inaad tahay qof shaqaysto oo noloshiisa ku filan luqada Jarmalkana aad barato. Halkaan waxaad ka helaysaa warbixinno dheeri ah oo kusaabsan.

## Waxyaabaha aasaasiga ah ee ugu Muhiimsan

Marka aad ku nooshahay Swiiserlaan, waa inaad Sharciyada Dowlada iyo xeerarka u dagsan dhowrtaa. Taas waxay la micno tahay, waa Tusaale ahaan: Dadka oo dhan in si ixtiraam leh kuwada socdaan. Dadka oo dhan isku si ayaa loogula dhaqmayaa, ruuxna lama takoorayo. Markii aad ku nooshahay Basel, waxaa kula gudboon Barasahada afka Jarmalka. Sidoo kale inaad tahay qof shaqaysta oo aan ceyr qaadanin.

Laakin isdhexgalka Bulshada waxay shaqaynaysaa kaliya marka dadka dhan wada samaynayaan. Reer Basel waxaa la gudboon inay qalbiyada idiin furaan. Waxaa la gudboon inay idin caawiyaan oo idin lasocod siiyaan waxaadan ogayn.

## Mas'uuliyadda gaarka ah

Basel ayaad soo dagtay sooma ahan? Dowlada Federaalka, Dowladda hoose, iyo Degmooyinka ayaa xil iska saaray inay ku sahlaan wadadii aad u qaadi lahayd nolosha shaqo, bulsho iyo dhaqan intaba. Laakin adigana waa in aad xil iska saartaa inaad isdhexgalka Bulshada sameeyso, luqadda barato qof shaqaystana ahaato. Waxaan kaaga fadhinaa inaad ka faaidaysato Fursadahan kuu sahlayo Isdhexgalka Bulshada.

## Kaqeyb noqoshada nolosha Bulshada

Waxaad ula qabsan kartaa waddanka sidan: Kooxaha ayaad ku biiri kartaa waxaadna isku baran kartaan dad cusub oo aad u wanaagsan. Ama waxaad booqan kartaa munaasabadaha iyo Dabbaaldegyada ka dhacayo Xaafadaada. Waxaa laga yaabaa bilowga hore inay xoogaa yara adagtahay. Dadka qaar dadka ajaanibta ah ee wadamada kale ka yimid uma furfurno. Laakin in muddo ah kadib ayay iska soo furfuraan ee Ha is dhiibin haddaba.

## Wargelin / Taagero

Waxaad soo dagtay Basel miyaa waxaadna u baahantahay in lagu caawiyo ama aad hesho macluumaad? Basel-Stadt waxaa ku yaallo Xarumo badan oo aa ku caawin kara. Hay'adaha dowlada ee Gobolka Basel-Stadt iyo Xarumahooda Degmada laga maamulo waxaad ka heli kartaa macluumaadyo badan. Waxaase kaloo jiro Xarumo ku caawin kara oo u gaar ah soo galootiga iyo ajaanibta oo aad tagi karto.
Warbixinno kusaabsan Nolosaha waddanka Swiserlaan iyo mowduucyo kale waxaad kaheli kartaa:

- Waaxda Ajaanibta ee Hay'adda Socdaalka Gobolka (GGG Migration)

Warbixinno kusaabsan Xaqa Magangelyo doonka iyo Xaqa Ajaanibta waxaad kaheli kartaa:

- Xarunta Talada iyo Taageerada Magangelyo doonka (Beratungsstelle für Asylsuchende BAS)
- Koox madax bannaan oo caawiso Soo galootiga iyo Ajaanibta (Freiplatzaktion)

Wali afka Jarmalka kuma hadli kartid soo maha? Hadaba horay usii kaxayso qofkuu turjumi karo. Turjumaan hadaadan haysan xitaa waad dalban kartaa in laguu keeno.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/sprache-und-integration/integration

# Fursadaha isdhexgalka Bulshada

Iskuullada, Goobaha xirfadaha lagu barto iyo goobaha shaqada ayaa inta badan laga helaa isdhexgalka ugu fiican. Laakin waxa macquul ah inaadan wali shaqo helin ama waxbarasho aadan ku jirin. Iskuulka luqadda xitaa aadan wali bilaawin. Hadaba waxaad ka faaidaysan kartaa fursadahaan kala duwan ee ku sahlaya inaad dalka la qabsato.

## Fursado qaas ah

Waxaa jiro waxyaabo badan oo gaar ah oo ay ka Faa'iidaysan karaan dadka ku cusub Basel. Tusaale ahaan, Dood wadaagyo, Waxyaabo ay qaban karaan waqtiyada fasaxa, Muxaadarooyin ama Casharro. Fursadahaan waxay kaa caawinayaan inaad isdhexgalka Bulshada iyo inaad dad is baratataan. Xarunta Talobixinta ee waaxda Socdaalka "GGG Migration" waxay idin siin doonaan warbixinno ku saabsan fursadaha la heli karo. Gobollka iyo Xaafadaha waxay sameeyaan munaasabado ay kusoo dhaweynayaan dadka ku cusub deegaanka. Halkan waxaad ka helaysaa warbixinno muhiim ah oo fikrado ka qaadan karto.

## Kooxaha

Shacab badan oo reer Swiiserlaan ah ayaa xubno ka ah Kooxo (Verein). Waxaa jiro Kooxo lagu biiri karo oo wax yaabo kala duwan qabta, sida Kooxaha ciyaaraha ama kuwa dhaqanka. Haddii aad ku biirto koox, waxaad isku baran kartaan dadkale. Kooxaha inta badan waa kuwa u furan dadka oo dhan laguna biiri karo.

## Ururrada arrimaha ajaanibta

Waxaa jiro kooxo ay samaysteen soogalootiga. Xubnaha ku jiro jaaliyadahan waxay iskula hadlaan inta badan hal luqad, maadama ay isku waddan ka yimaadeen ama ay yihiin isku diin. Kooxahaan waxay siiyaan inta badan fursado dadka ku cusub wadanka Swiiserlaan ee soo dego Gobolka Basel-Stadt. Waxay kaa caawin karaan isdhexgalka Bulshada.

## Fursadaha Dhalinyarada

Dhalinyarada waxay ay waqtiyadooda firaaqada heli karaan fursado badan oo ay kaga faaideysan karaan inay qabtaan ama bartaan waxyaabo ay jecelyihiin. Waxay ka qayb gali karaan mashruuc misna ku biirin karaan fikradahooda. Khabiiro ayaa garab taagan oo ka warqabo dhalinyarada (Jugendarbeit). Sida caadiga ah fursadahaan waa kuwo bilaash ah.

## Bar kulanka dadka xaafadda degan

Goobaha dadka xaafadaha deggan isugu yimaadaan (Quartiertreffpunkte) waxay u furanyihiin dadka oo dhan. Waxay hayaan Adeegyo loogu talagalay Qoysaska, dadka da'da ah iyo dadka luqadda jarmalka aan sidaas usii garanaynin. Meelaha qaar ee lagu kulmo waxaa kamid ah xarumaha Qoyska. Halkaas waa meel ay isugu yimaadaan oo u furan waalidiinta iyo caruurtooda. Goobaha dadka xaafadda isugu yimaadaan waxaad kaheli kartaa talooyin iyo taageero ku saabsan nolol maalmeedka. Goobaha ay dadka xaafadaha ku kulmaan waxaa ka kireysan kartaa Qolal aad ku qabsan karto xafladaha qoyska xafladaha kale.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/sprache-und-integration/integrationsangebote

# Luqadda

Waxaad soo dagtay Basel-Stadt af Jarmalkana wali kuma hadli kartid miyaa? Haddaba waxaa kula gudboon sida ugu dhaqsiyaha badan inaad u barato af Jarmalka. Marka aad ku hadli karto luqadda, waxaad si fiican u baran kartaa Dalka iyo Dadka si fududna waxaad ku heli kartaa Shaqo.

## Afka Jarmalka Caadiga ah / Af Jarmalka Swiiska

Wadanka Swiiserlaan waxaa looga hadlaa 4 luqadood: Afka Jarmalka, Afka Faransiiska, Af Talyaaniga iyo Afka Retoromaanishka. Luqadda Gobolka Basel-Stadt waa Afka Jarmalka. Waxaa Jiro Af Jarmal Caadi ah iyo Af Jarmal Swiiserlaan kaliya Looga hadlo.

- Af Jarmalka aan Caadiga ah (Standarddeutsch)
  Dadka gobollada af Jarmalka looga hadlo deggan waxay qoraan af Jarmalka aan lahjadda ahayn. Iskuullada iyo qaybo kamid ah idaacadaha iyo Talefishinada waxay ku hadlaan af Jarmalka caadiga ah.
- Af Jarmalka Swiiska (Schweizerdeutsch)
  Af Jarmalka Swiiska waa lahjad af Jarmal ah. Dadka inta badan marwalba af Jarmalka lahjadda ah ayay ku hadlaan. Waxaa macquul ah inay kugu adagtahay lahajaddaas hadii xataa aad ku hadasho jarmalka caadiga ah. Lahadjad inta lugula hadlay ma fahmi waysay? Ka codso hadaba dadka, Af Jarmalka caadiga ah inay kugula hadlaan. Qasab kuguma ahan adiga inaad ku hadasho af Jarmalka Swiiska laakin waa muhiim muddo markaad waddanka joogto inaad fahmi karto.

## af Jarmalka iyo Caruurta

Ubadkaada luqqad aan Af Jarmal ahayn ayuu ku hadlaa miyaa? Haddaba sida ugu dhaqsaha badan waa in Carruur af Jarmal ku hadasho ay isku bartaan. Sida ugu dhaqsaha badan uu ku barankaro Ubadkaaga ayaa sidaas ah. Tusaale ahaan waxaad ku dari kartaa Kooxo uu la ciyaaro (Spielgruppe). Waxaa jirto sidoo kale Adeegyo gaar ah oo loogu talo galay Waalidiinta iyo Ubadka.
Kuma hadlo miyaa Ubadkaaga wali af Jarmalka mise waxuu ku hadlaa kaliya wax yar? Hadaba waxaa qasab ah in ugu dambeyn 1 sano kahor Xannaanada intuu bilaabin uu barto afka Jarmalka. Waxaan kugu soo wargelin doonaa Warqad qoraal ah 18 bilood kahor inta uusan gaarin xilliga uu Xannaanada bilaabi lahaa. Fursadaha aad heli karto waxaa kamid ah tusaale ahaan:

- Meel lagu ciyaarsiiyo Ubadka oo xoogga lagu saarayo barashada af Jarmalka (Spielgruppe)
- Goobaha Xannaanada Caruurta (Kita) ee Af Jarmalka loogaga hadlo
- Maalin Joogga Qoysaska

Ubadkaaga waxaad ka caawin kartaa inuu hadal barto. Waxbadan lahadal Ubadkaada, Markuu hadlaayo dhagayso oo uga sheekey sheeko xariirooyin. Kula hadal luqadda aad sida fiican ugu hadasho ama aad jeceshahay inaad ku hadasho.

## Tarjumidda / Adeegyada Tarjumaannada

Maku cusubtahay magaalada Basel, afka jarmalkana wali sifiican ma ugu hadashid miyaa? Haddaba waxaad u baahantahay qof marmar kuu tarjummo. Waxaa macquul ah inaad weydiisan karto inay kuu tarjummaan ehelkaaga ama dad aad taqaano.
Laakin waxyaabaha qaar ee laguu tarjummaayo waxay noqon karaan kuwo addag ama sir kuu ah.Tusaale ahaan, Isbitaalada ama Dowladda. Saas awgeed waxaa laga yaabaa inay kuu fiicantahay inuu kuu tarjummo Tarjummaanada dhaqanka ama Tarjumaanada kale. Waa Xirfadleyaal qaas u ah Dadka leh dhaqamada kale. Xirfadleyaashan waxay yaqaanniin dhaqankaaga waxayna kuugu tarjumi karaan si aad u wada fahanto.
Warqad qoraal ah oo Hay'adda socdaalka ee waaxda ajaanibta kaaga timid ma fahmi waysay? Mise Warqad in aad soo buuxiso ama aad soo qorto lagaaga baahanyahay ma jirtaa? Halkan ayaad ka helaysaa Caawinaad:

- Adeegga Tarjumida ee GGG Migration

## Heerka luqadda ee lagu xiro qaadashada Sharciyada iyo Dhalashada

Waxaa macquul ah inaad codsanayso sharciga Joogista ee (B) ama sharciga Joogista ee (C). Ama waxaa doonaysaa inaad qaadato dhalashada wadanka. Af Jarmalkana ma ahan luqadaada hooyo sooma ahan? Hadaba waxaad u baahantahay shahaado cadaynaysa inaad luqada si fiican ugu hadasho.
Xog la xiriirta waxyaabaha lagaaga baahanyahay marka aad xaraysanayso waxaad ka helaysaa halkan:

- Hay'adda socdaalka waaxda ajaanibta (Migrationsamt)

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/sprache-und-integration/sprache

# Barashada af Jarmalka

Koorsada af Jarmalka waxaad ka baran kartaa af Jarmal fiican. Waxaa jiro koorsooyin badan oo af Jarmal ah.

## Koorsooyinka laheli karo

Waxaa Jiro Koorsooyin badan oo kaladawan oo af Jarmal ah. Tusaale ahaan:

- Hadii aad haysato Caruur yaryar, waxaad booqan kartaa Koorso Caruurta laguugu dhex haynaayo.
- Waxaa macquul ah inaadan wali baranin xarfaha laatiinka ama ay dhib kugu yihiin wax- akhriska iyo qorista. Hadaba waa inaad booqataa Koorsada lagu barto alifbeetada (Alphabetisierungskurs).

Halkan waxaad kahelaysaa xog kusaabsan koorsooyinka bannaan iyo qiimahooda:

- Xarunta Waxbarashada dadka Waaweyn (Fachstelle Erwachsenenbildung)
- Waaxda Ajaanibta (GGG Migration)

## Heerarka luqadda

Sida ugu fiican ee qof ugu hadlo luqadda Jarmalka waxaa lagu cabiri karaa Qaabka guud ee yurub oo dhan ka midaysantahay "Gemeinsamen Europäischen Referenzrahmen" ee marka lasoo gaabiyo loo yaqaano GER. Heerka lagu cabirro luqadaha ee GER waxay leedahay 6 heer: A1, A2, B1, B2, C1 iyo C2. Hadii aad haysato shahaadada heerka A1 ama A2, waxaad ka dhisantahay aasaaska af Jarmalka. Hadii aad haysato heerarka C1 ama C2, meel aad u fog ayaad ka gaartay barashada afka.

- Ma doonaysaa inaad Xirfad barato shahaadadeeda laga aqoonsanyahay wadanka Swiiserlaan? Haddaba waxaad u baahantahay Heerarka luqadda ee B1 ama B2.
- Haddii aad doonayso inaad Barato Jaamacad, waxaad u baahantahay Heerka C1 iyo C2.

## Maalgelinta Luqadda

Ma ku cusubtahay Basel mana haysataa sharciga B-da? Waxaad lagu siinayaa Jeeg aad ku baran karto Koorso af Jarmal ah. Waxaa laguu ogolyahay inaad ku barato 80 Cashir si bilaash ah. Jeegga waxaad ula tagi kartaa Iskuullada luqadaha lagu barto, ee uu Gobolka aqoonsanyahay. Jeeggan waxuu dhacayaa 12 bilood kadib maalinkii aad soo dagtay.
Ma doonaysaa casharadii bilaashka ahaa wax ka badan inaad dhigato? Hadaba waa in aad iskaa isaga bixiso. Koorsooyinka way ku kala duwan yihiin qiimaha. Waxaa kuu fiican inaad iskuullo badan soo fiiriso oo is barbardhigto midka kuu raqiisan. Gobolka Basel-Stadt Koorsooyinka qaar wuxuu ku caawiyaa kharashaad. Koorsooyinka noocaas ahna waxaad ku baran kartaa qiimo jaban.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/sprache-und-integration/deutsch-lernen